- Magaca Buugga: **Hooyo Qaali**
- Qoraaga: Kassim Mayow Ahmed
- Tirada Bogagga: **10**

# HORUDAC

Buuggan "Hooyo Qaali" waxa uu leeyahay ujeedo cad oo ah in uu dhiirrigeliyo qalbiyada inay hooyadooda u muujiyaan mahadnaq, kalgacal, iyo daryeel. Waxaa ku xardhan sheekooyin iyo xikmado ka tarjumaya qiimaha aan la soo koobi karin ee hooyada, taas oo mar walba lagu tilmaamo inay tahay ilayska nolosha iyo tiirka bulshada.



بِسۡمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحۡمَٰنِ ٱلرَّحِي

۞ وَقَضَىٰ رَبُّكَ أَلَّا تَعۡبُدُوٓاْ إِلَّآ إِيَّاهُ وَبِٱلۡوَٰلِدَيۡنِ إِحۡسَٰنًاۚ إِمَّا يَبۡلُغَنَّ عِندَكَ ٱلۡكِبَرَ أَحَدُهُمَآ أَوۡ كِلَاهُمَا فَلَا تَقُل لَّهُمَآ أُفّٖ وَلَا تَنۡهَرۡهُمَا وَقُل لَّهُمَا قَوۡلٗا كَرِيمٗا

Al- Isra 23. Wuxuu guddoonshay Rabbigaa inaadan caabudin cidna Isaga maahee iyo u sama fal labada waalid. Hadduu midkood ama labadoodaba ku soo gaaro agtaada da' weyni, ha ku odhan erey aanfiicnayn haba ahaatee “uf” hana ku qeylin, oo kula hadal, hadal wanaagsan oo xurmo leh.

Alle wuxuu diiday in la yidhaahdo waalidka: "Uf aan la maqleyn” marka wixii ka sii weyn oo qowl ama ficil ah ka daran oo ka denbi weyn, mana bannaana. Bal wuxuu Alle amray in la xurmeeyo oo la xaq dhowro oo si fiican loo xiriiriyo oo la wanaajiyo oo loogu adeego si farxad iyo laab furni leh. Uf waa muujin diiddo ama nac.

## HOYADA WAA NUUR

Hooyadu waa sida dayaxa oo kale oo ifaya habeen kasta, ka iftiimisa jidka aad ku socoto. Waxay na siisaa kalsooni iyo taageero joogto ah, iyada oo iftiimisa dariiqa toosan ee mustaqbalka iyo wanaagga. Hooyo waa nal ay carruurteedu ka helaan iftiin nololeed, waxayna mar walba diyaar u tahay inay hagto, jeceshahay inay aragto ilmaheeda oo horumar sameynaya.

Mar kasta oo aan wajahno caqabadaha nolosha, hooyadu waa qofka aan ka daalin dhiirrigelinta iyo tusaalaynta wanaagga. Waxay la mid tahay gabbal dhacaya oo aan weligiis damin, si tartiib ah u xasuusinaya ubadkeeda in rajo jirto, una muujinaya xalka ay ka heli karaan dhibaatooyinka. Jacaylka iyo naxariista hooyo waa sida ifka qorraxda oo kale, aan la qiyaasi karin qiimihiisa, loogana maarmin nolol maalmeedka.

## JACAYLKA HOYO

Jacaylka hooyo waa mid aan xad lahayn oo qoto dheer, kaas oo ka sarreeya wax kasta. Waa dareen dabiici ah oo ku abuuray qalbiga, kana dhiga mid aan shuruud lahayn, isagoo siinaya caruurta taageero iyo kalgacal waqti kasta oo nolosha ah.





# DADAALKA IYO SAMIRKA HOYO

Hooyadu waa astaan u taagan dadaal aan caadi ahayn iyo samir aan dhammaad lahayn. Waxay si joogto ah ugu hawlan tahay inay hubiso in ilmaheedu helaan nolol raaxo leh iyo fursado wanaagsan, iyadoo mar walba ka horeysa danta qoyska.




# Alllow unaxariiso Hooyo iyo Aabo aduun iyo aaqiro



# CUQUBADA QOFKA CAASIGA

Waxaa la sheegay in nin ka mid ahaa ummaddii hore uu ahaa qof si xun ula dhaqma hooyadiis, isagoo caasi waalid ahaa. Markii uu dhintay, dadka deegaanka ayaa arkay dhacdo layaab leh: maalin kasta waqtiga casariga, qabrigiisa ayuu kasoo baxayay isagoo leh madaxa dameerka iyo jirka aadanaha. Arrintan ayaa dadka deegaanka ka nixisay, waxayna u tageen culimada si ay wax uga ogaadaan sababta dhacdadan cajiibka ah.

Culimadii ayaa ogaaday in ninkani uu ahaa caasi waalid, gaar ahaan hooyadiis. Sidaas darteed, waxaa lagu ciqaabay inuu maalin kasta qabrigiisa kasoo baxo isagoo leh muuqaal dameer, taasoo muujinaysa xumaanta caasinimada waalidka iyo sida ay u keeni karto ciqaab daran adduun iyo aakhiroba.

Qisadan waxay ina xasuusinaysaa muhiimadda weyn ee xushmada iyo wanaagga waalidka, iyo in caasinimada waalidku ay leedahay cawaaqib xun oo qofka ku soo laabata.

# CALAAMADAHA QOFKA CAASIGA AH

- Waalidka oo laga oohiyo
- Waalidka oo lagu qeyliyo ama la caayo
- Amarka waalidka oo la diido
- Waji xanaaqsan oo waalidka loo muujiyo
- Waalidka oo la dayaco marka ay u baahan yihiin daryeel.



# GABAYGA HOOYO



Hooyoy waxaad tahay,
Hilow qalbiga yaalla,
Hablaha iyo wiilasha,
Hoggaan iyo iftiin waara.

Hooyoy waxaad tahay,
Hodan aan la helo,
Hilaac iyo harraad jaba,
Hobolloy tihiin hooyooy!

Hooyoy waxaad tahay,
Hir aan laga haajirin,
Hoygii naxariista,
Iyo hadal macaan badan.

Hooyoy waxaad tahay,
Halgamaa aan hurdo lahayn,
Hammigeeda u hurta,
Ubaxeedii in ay horumarto.

Hooyoy waxaad tahay,
Hawraar iyo duco joogta,
Illaahey ha kuu siyaadiyo,
Ajar ha kaa siiyo dhibkaad martay.

Hooyoy waxaad tahay,
Hanti aan lagu kala harin,
Haweenkaad ka mudan tahay,
Hooyadeedii dunida oo dhan.

🌹 **Alahayow U Naxariiso Hooyo Macaan iyo Aabo Qaaliga ah**

**Alahayow u naxariiso hooyo macaan iyo aabo qiimo badan, qabrigooda u nuuri, dambigooda dhaaf, jannada ku hoysi! Aamiin.**

📖 **Lasoco qaybaha xiga ee buugga "Hooyo Qaali" – qoraal ka hadlaya jacaylka waalidka, xusuusta iyo xurmaynta waalidnimo.**

💬 **If you want this in English.**
**Contact us for the English version of the book and more inspirational family-centered content.**

---

📲 **Nala Soo Xiriir:**

🔵 **Facebook: @akhiikassim**
📞 **WhatsApp: +1 506-639-2155**
🌐 **Website: alqiyaam0.blogspot.com**

---

**Asalaamu calaykum waraxmatullaahi wabarakatuh**